

**Xeer lamb. 163 ee 16 Luulyo 1962**

**Ballarinta hab dhismeedka Guddiga Qorsheynta iyo Iskudubarid horumarinta dhaqan-dhaqaale ee Jamhuuriyadda**

### **MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

Kadib markii la arkay qod. 85 ee Dastuurka.

Kadib markii la arkay dekreeto lamb 261 ee 28 Oktoobar 1961 ee lagu dhisay Guddiga Qorsheynta iyo isku-dubaridka Horumarinta dhaqan-dhaqaale ee Jamhuridda.

Kadib markii la arkay dekreetada lamab 295 ee 6 Disembar 1961 ee khuseyey xubnaha Guddigasi.

Kadib markii la garwaaqsaday baahidda loo qabo in la ballariyo tirada xubnaha oo lagu daro xubin ah Taliyaha Ciidanka Qaranka iyo Taliyaha Booliska.

Kadib markii la dhegeystay Golaha Wasiiradaha.

Kadib talo soo jeedinta Rai'sul Wasaaraha.

### **WUXUU XEEREYAY**

#### **Qod. 1**

Waxaa loo magacaabay xubno ka tirsan Guddiga Qorshaha iyo isku dubaridka horumarinta dhaqan-dhaqaale ee Jamhuuriyadda:

- Taliyaha Ciidanka Qalabka Sida;
- Taliyaha Ciidanka Booliska.

#### **Qod. 2**

Dekreetadani waxay hirgeleysa maalinta ku xiga maalinta lagu soo dabaaco Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 6 Luulyo 1962.

**Aden Abdulle Osman**

Rai'sul Wasaaraha

**Abdirashid Cali Shermarke**

Waa la arkay waana la diiwan geliyey- diwaan lamb1 bogga 231

Muqdisho, 25 Luulyo 1962.

Xisaabiyaha Guud: **Dr. Ahmed Dahir**